Ogaysiiska Helitaanka Luuqadda – Adeegyada Turjumaada iyo Fasiraada

Hel Adeegyada Degmada Maamulka Dugsiga ee Bellevue oo Leh Turjumaad ama Fasiraad

Dhigaalada Helitaanka Luuqadda ee Loogu Talagalay Qoysaska

Waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay xog muhiim ah ka helaan dugsiyada oo ay ku helaan luuqad ay fahmi karaan. Degmada Maamulka Dugsiga ee Bellevue waa inay bixiso adeegyada turjumaada iyo/ama fasiraada, marki loo baahdo, si loola xidhiidho waalidiinta ay ku yar tahay aqoonta Ingiriisiga (oo ay ku jiraan waalidiinta ay liidato aqoontooda ku hadalka, dhagaysiga, akhrinta ama qorida Ingiriisiga).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Xuquuqaha Helitaanka Luuqadda ayaa laga heli karaa gujo-raacyada soo socda:

- Amxaari
- Carabi
- Cambodian
- Shiinees
- Ingiriis
- Faransiis
- Hindi
- Jabbaaniis
- Kuuriyaan
- Marshallese
- Punjabi
- Roomaaniyaan
- Ruush
- Samoan
- Soomaali
- Isbaanish
- Tagalog
- Telugu
- Tigrinya
- Yukreeniyaan
- Urdu
- Fiyatnaamiis

Waxaad heli kartaa nuqulka qaynuunka iyo habraaca helitaanka luqadda ee degmada maamulka ee xafiiska dugsi walbo ama degmo walbo. Waxaad sidoo kale onleen ahaan uga akhrisan kartaa kartaa

halkaan:**Qaynuunka 4218- Qorshaha Helitaanka Luqadda (Policy 4218- Language Access Plan), Habraaca 4218 P Qorshaha Helitaanka Luqadda (Procedure 4218 P Language Access Plan), Bandhigga A Codsiga Turjumaada iyo Fasiraada (Exhibit A Request for Interpretation and Translation)**

Talooyin Loogu Talagalay Waalidiinta/Qoysaska

Haddii aad u baahan tahay turjumaad ama fasiraad si aad u fahamto macluumaad kaaga yimid dugsiga ilmahaaga ama si aad ula xidhiidhid dugsiga ilmahaaga:

- Ka dalbo turjumaan miiska hore ee dugsiga, ama waydii haddii qofka shaqaalaha ah uu soo gelin karo turjumaan wicitaanka taleefonka iyada oo la isticmaalayo *LanguageLine Solutions*.
- Wac taleefonka koowaad ee dugsiga oo ka dalbo turjumaan;
- Dir iimayl kooban (oo Ingiriis ah ama luuqadaada gaarka ah) adiga oo dalbanaya inuu qof ku soo waco, uu la socdo turjumaan, si aad u qorshaysato kulan ama aad kala hadasho su'aal ama walaac.

Tusaalaha iimayl lagu codsanayo turjumaan:

Macalinka Qaaliga Ahoow (ama Maamule, La-taliye, Kalkaaliye):
Magacaygu waa _____ waxaan ahay waalidka _____. Waxaan rabaa inaan kaala hadlo ilmahayga. Fadlan ma isoo wici kartaa adiga oo turjumaan wato? Lambarka taleefonkayga waa: ____. Mahadsanid.

- Haddii aad hesho ogaysiis qoraal ah, iimayl, ama dukumiinti kale oo ku qoran Ingiriis oo aad fahmi waydo, ka dalbo qofka soo diray iyaga oo ku fasiran luuqadaada.
- Haddii qofka uusan wakhti sax ah kugu siin karin fasiraad qoran oo dhamaystiran, dalbo inaad la kulanto qofka shaqaalaha dugsiga iyo turjumaan si dukumiintiga laguugu fasiro af ahaan, adiga oo wakhti kugu filan u helayo inaad qoraal qaadato.

Haddii aad qabto su'aalo, ama u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad hesho turjumaad ama fasiraad, la xidhiidh:

- Maamulaha ilmahaaga;
- Isku-duwaha Helitaanka Luuqadda ee Degmada Maamulka Dugsiga ee Bellevue ee barta languageaccess@bsd405.org

Waa Kuwan Xuquuqahaaga!

Sida waafaqsan sharciyada xuquuqaha madaniga ah ee gobolka iyo federaalka, waxaad xaq u leedahay inaad macluumaad ku hesho luuqadaada. Fadlan ogoow in dugsiga uusan kaaga argoosan doonin adiga ama ilmahaaga inaad walaac soo gudbiseen ama aad dacwad xarayseen.

Walaacyada iyo dacwadaha

Haddii aad walaacyo ka qabto adeegyada turjumaada iyo fasiraada ee dugsiga—ama haddii aan lagu siinin turjumaan ama fasiraad aad u baahnayd—waxaad haysataa fursado badan.

1. **La hadal maamulahaaga ama shaqaalaha dugsiga oo aad ku kalsoon tahay.** Inaad wada hadal la yeelato maamulaha dugsigaaga ayaa inta badan ah talaabada koowaad ee ugu wanaagsan

ee wax looga qabto walaacyadaada. U sharax waxa dhacay, oo ha ogaado maamulaha waxa uu samayn karo si uu gacan uga gaysto xalinta dhibaatada.

2. **La hadal Degmada Maamulka Dugsiga.** Waxaad sidoo kale kala xidhiidhi kartaa Sarkaalka U Hogaansanaanta Xuquuqda Madaniga ee Degmada Maamulka Dugsiga ee Bellevue Nancy Pham lambarka (425) 456-4040 ama phamn@bsd405.org si aad ula wadaagto walaacyadaada.

3. **Codso in lagaa caawiyo inaad xaliso walaacyadaada.** Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa hay'adahan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahaaga ama caawinta si aad u xaliso walaacyadaada.

Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqaha Madaniga (Equity and Civil Rights Office) Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbaridda Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction) 360-725-6162 | www.k12.wa.us/equity	Xafiiska Dhexdhexaadiyaha ee Waxbarashada (Office of the Education Ombuds) 1-866-297-2597 | oeo.wa.gov

4. **Waxaad gudbin kartaa cabasho.** Si aad cabasho u gudbiso, ku sharax waxa dhacay qoraal ahaan—luuqad walbo—oo ugu dir degmada maamulka dugsiga boostada, iimaylka, ama gacanta ugu geey. Xaqiiji inaad nuqul ka reebato si aad u kaydsato.

   30 maalmood oo shaqo jirto gudahooda, degmada maamulka dugsiga ayaa baari doonta cabashadaada oo jawaab kugu siin doonta qoraal ahaan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha cabashadaada ayaa onleen ahaan looga heli karaa halkan: https://bsd405.org/about/resources/notices/discrimination/.